# Waxaa la qorshaynayaa in tallaalka loo fidiyo 16- iyo 17-jirrada

Dawladdu waxay qorshaynaysaa in tallaalka koroonaha loo fidiyo 16- iyo17-jirrada, kaddib marka ay tallaal buuxa qaataan dadka 18 sano ka weyn. Bisha sibteembar ayaa taas laga qaadan doonaa go'aan kama danbays ah.

Machadka caafimaadka dadweynuhu (FHI) wuxuu ku talinayaa in tallaalka koroonaha loo fidiyo 16- iyo 17- jirrada, kaddib marka ay tallaal buuxa qaataan dhammaan dadka 18 sano ka weyn. Taas ayaa ah mid ku salaysan aqoonta maanta la hayo. Muddada soo socota ayaan aqoon iyo khibrad intaan ka sii badan ka kororsan doonnaa waddammada kale ee dhallinyarada tallaala.

– Waxaan doonaynaa in aan aqoonta ugu badan ee suurtagalka ah u yeelanno saamaynta iyo waxyeellada tallaalku keeni karo ka hor intaan Norway lagu tallaalin dadka ka yar 18 sano. Sidaas darteed ayay dawladdu dib u dhigaysaa in ay go'aan kama danbays ah ka gaarto tallaalista 16- iyo 17- jirrada, waxaana lala sugayaa ilaa inta Machadka caafimaadka dadweynuhu qiimayn kale ka samaynayo bisha sibteembar, ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka.

**Waxaa degmooyinka loo diyaarinayaa ballaarinta barnaamijka tallaalka**
Barnaamijka tallaalka ee maanta jira waxaa loogu talagalay dadka jira 18 sano (jiilkii 2003) iyo wixii ka weyn. Waxaa kale oo tallaalka la siiyaa dadka u dhexeeya 12 ilaa 18 sano ee khatarta weyn ugu jira in ay aad ugu xanuunsadaan haddii cudurku ku dhaco. Haddii FHI taladiisii hore ku adkaysto qiimaynta cusub ee sibteembar kaddib, waxay markaas aad ugu badan tahay in 16- iyo 17- jirrada lagu dari doono barnaamijka tallaalka.

Sida ay sheegeyso saadaashii ugu danbaysay ee FHI waxay tallaalidda dadka da'daan ah dhici kartaa ugu horreyn bisha oktoobar.

– Waxaan doonaynaa in aan degmooyinka u diyaargarayno in ay dhici karto in 16 iyo 17-jirrada lagu daro barnaamijka tallaalka dayrtaan. Degmooyinku waxay u baahan yihiin wakhti ay ku qorsheeyaan tallaalidda kooxdaan iyo in loo sii sheego in barnaamijka tallaalku sii socon doono kaddib marka la tallaalo dadka ka weyn 18 sano, ayuu yiri Høie.

Hadda tallaalka keliya ee loo oggol yahay dadka da'daan ah waa tallaalka mRNA ee ay soo saareen Pfizer/BioNTech.

**Maalin caadi ah**

Dhallinyarada ay da'doodu u dhexayso 16-17 sano uma badna in ay aad ugu xanuunsadaan covid-19. Macluumaadka ilaa iyo hadda la og yahay waxay sheegayaan in ay yar tahay waxyeellada danbe ee timaadda marka aan aad loogu xanuunsan covid-19.
Macluumaadka FHI waxay islamarkaana sheegayaan in dhallinyarada u dhexaysa 16-19 sano in covid-19 laga helo in ka badan inta carruurta ka da'da yar. Taas oo laga yaabo in ay keentay in ay kuwa da'daan ahi ka socod badan yihiin oo ay is arkaan dad ka badan inta dhallinyarada ka yaryar iyo carruurta. Lama oga sida uu cudurkan safmarka ah noqon doono dayrta iyo qaboobaha, iyo sida kala qaadista cudurka ee dhallinyaradu u saamayn doono maqnaashaha iskoolka iyo tillaabooyinka ka hortagga cudurka.

–In kasta oo aanay 16- iyo 17-jirradu aalaaba aad ugu xanuunsan covid-19, haddana wuxuu cudurku ugu dhacaa in ka badan inta dhallinyarada ka yaryar iyo carruurta. Intii cudurkan safmarka ah socday na culays weyn ayaa kooxdaan ka soo gaaray tillaabooyinka. Dhibka ka imaanaya tallaalistooda waa in loo eegaa faa'iidada ugu jirta in ay heli karaan maalin caadi ah oo ay yar yihiin tillaabooyinka ka hortagga cudurku, ayuu yiri Høie.